



UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 09/10/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Xafiiska Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- ABDIRAHMAN ABDIKARIN IBRAHIM, Ina Faadumo Sheekh Axmed, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 03/10/1987, Sita: Somali passport, Lr. S00016211.

LA WAKIISHE:- MOHAMUD MOHAMED ALI, Somali ah, Ina Caasho Cilmi Maxamed, Ku Dhashay: Dhuusomareb, Sanadkii: 12/02/1990, Sita Nira ID, Lr. 74945233990, Dagan Waabari .

TILMAAMAHA DHULKA

Dhul Banaan oo Ku yaal: Degmada: (Afgooye gaar ahaan Deegaanka C/biyaha (Soonaha Muusaaleey)), Cabirka: (20X75-Mt), Looto No: 953,955,957,959,961, Sida ku cad Warqadda Heshiis Hibeyn Dhul Banaan: (Rep.No.23798/BRK/25), Tr. 18/08/2025, Kana Soo Baxay Nootaayo **Taqiulo** Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Maxamuud

SOOHDINTA DHULKA

Bari: **Jid**, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: **Jid**

B- Aniga oo ah **ABDIRAHMAN ABDIKARIN IBRAHIM**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **MOHAMUD MOHAMED ALI** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihisu Sare Ku Xusan yihiin, in Dhulkaas uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **MOHAMUD MOHAMED ALI** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Dhulkaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **MOHAMUD MOHAMED ALI**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **ABDIRAHMAN ABDIKARIN IBRAHIM**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

ABDIRAHMAN ABDIKARIN IBRAHIM

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- NURDIN MOHAMED MOHAMUD

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

MOHAMUD MOHAMED ALI


2- ALI HUSSEIN MUHUMED

REP. 1881/T.P.N/25, Tr. 09/10/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **ABDIRAHMAN ABDIKARIN IBRAHIM** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **MOHAMUD MOHAMED ALI** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: C/qani

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





XAFIISKA NOOTAYAHA TAAKULO EE MUQDISHO

Rep. No. 23798/BRK/25

Tr. 18/08/2025

UJEEDDO: HESHIIS HIBEYN DHUL BANAAN

Maanta oo ay taariikhdu tahay 18/08/2025, aniga oo ah Nootaayo Taakulo ee Muqdisho Dr. Saciid Cali Maxamuud, waxaa i hor yimid ayagoo heshiis ah dadka kala ah:

1. **Raqiyo Mohamed Ali**, Soomaali ah, hooyadeedna la yiraahdo **Fadumo Sharif Mohamed**, ku dhalatay **Muqdisho**, sanadkii 1989, degan **Muqdisho**, lehna **Basaboor** lambarkiisu yahay **P01195211** kana soo baxay **Soomaaliya** ee ku lifaaqan warqadaan (Hibeysada dhulka).
2. **Maxamuud Maxamed Cali**, Soomaali ah, degan **Muqdisho**, kana wakiil ah loo hibeeyaha dhulka **Abdirahman Abdikarim Ibrahim**, hooyadiisna la yiraahdo **Fadumo Sheikh Ahmed**, Soomaali ah, ku dhashay **Muqdisho**, sanadkii 1987 (Wakiilka Loo Hibeeyaha dhulka).

Ugu horeyn **Raqiyo Mohamed Ali**, ayadoo ka caafimaad qabto dhanka maskaxda, cid ku qasabtayna aysan jirin, waxay u hibeysay kuna wareejisay **Abdirahman Abdikarim Ibrahim**, dhul shan boos ah oo banaan, ku yaallo degmada **Afgooye** gaar ahaan deegaanka **C/biyaha (Soonaha Muusaaleey)**, cabirka: **20X75M**, Lotto No. **953,955,957,959** iyo **961**, soohdiintiisu tahay **Koonfur Dhul Dad**, Waqooyi **Jid**, Galbeed **Dhul Dad**, Bari **Jid**, waxay hibeysada dhulkaas ku milkisay **W.M.L Rep. No. 717/2023**, Tr. **08/08/2023**, ka soo baxday xafiiska **Nootaayo Najib**, kuna saxiixan yahay **Dr. Najib Cabdi Cali (Najib Nootaayo)**. Sidoo kale hibeysada waxay cadeysay in dhulkaas uu ka madax banaan yahay rahan iyo wax waliba oo dhib u keeni kara nidaamka lahaanshaha milkiyadeed.

Sidaasi darteed laga bilaabo taariikhda kor ku xusan, maamulkii iyo manfacii dhulkaas waxay si sharci ah ugu wareegeen loo hibeeye **Abdirahman Abdikarim Ibrahim**, oo wakiil u yahay **Maxamuud Maxamed Cali**, isagoo aqbalay kuna qanacsan hibadan, waana hibo sax ah oo waafaqsan shareecada Islaamka iyo qaanuunka dalka Soomaaliya.

SAXIIXA HIBEEYAHA DHULKA

RAQIYO MOHAMED ALI

SAXIIXA WAKIILKA LOO HIBEEYAHA

MAXAMUUD MAXAMED CALI

SAXIIXA MARQAATIYAASHA

XASAN NUUR WEHLIYE

CALI MAXAMED C/LAAHI

SUGITAANKA NOOTAAYADA

Rep: 23798/BRK/25, Tr. 18/08/2025, Anigoo ah **Dr. Saciid Cali Maxamuud**, waxaan sugayaa in saxiixyada kor ku xusan iyo kuwa ku keydsan diiwaankuba ay yihiin kuwii runta ahaa ee lagu saxiixay horteyda, waana sugitaan ansax ah, oo waafaqsan shareecada Islaamka iyo qaanuunka dalka Soomaaliya.

NOOTAAYAHA
Dr. Saciid Cali Maxamuud






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 13/10/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Maxamuud Maxamed Cali** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1881/T.P.N/25, Tr. 09/10/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Maxamuud Maxamed Cali
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X75
Ku Yaallo	Afgooye, Degmada Deegaanka Ceelasha Biyaha Soona Muusaaley
Lotto Lambar	953-955-957-959-961
W.M.L	23798/BRK/25, Tr. 18/08/2025 Ka soo baxday Nootaayo Taakulo
Taariikhda Wakaalada	09/10/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **Maxamuud Maxamed Cali**, Leh Tel No. **0618141490**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Maxamuud Maxamed Cali